



Dib u habeynta xafiiska dhexe ee PPS

Bulshada PPS ee qaaliga ah,

Lix bilood ka hor, Guddiga Maamulka iyo bulshada Portland ayaa igu aaminay sharafta iyo masuuliyada ah in aan caawimaad ka geysto dhisida iyo wax ka bedelida nidaamka dugsiyada dadweynaha oo damaanad qaadaya helitaan loo wada siman yahay, fursad, iyo natiijooyinka loogu talagalay dhammaan ardaydeena. Taageerada iyo hoggaaminta, waxaanu ku jirnaa hawl hore u socota si aan u dhisno nidaam diiradda saaraya-sinnaanta isla markaana ardayga muhiimada siinaya. Halgankeenu waa in la hubiyo in arday kasta oo ka mid ah degmadeena uu helo khibrad waxbarasho oo heer sare ah, oo ah mid ah u diyaarisa in uu shaqeeyo, ku noolaado isla markaana barwaaqo ku gaaro magaaladeena wanaagsan.

Shaqadani waa mid halgan leh isla markaana adag, taasi oo ay hawsha mid adag ka sii dhigeen khayraadka xadidan ee la heli karo si loo dhammeystiro hawshan. PPS waxaa markale la soo gudboonaaday dejinta miisaaniyad loogu talagalay sanad dugsiyeedka soo socda halkaasi oo ay tahay in aan gaarno go'aano adag iyo tanaasulaad si wax looga qabto hoos u dhaca la taabaan karo ee yimid dakhliga. Waa inaanu dib uga fikirnaa adeegyadayada muhiimka ah ee ku aadan dugsiyada isla markaana mudnaanta siinaa adeegyada iyo taageerooyinka sida toos ah u saameynaya natiijooyinka ardayga.

Taasi awgeed waxaanu dib u habaynaynaa tiro ka mid ah shaqooyinka hawlaha xafiisyada dhexe si aan uga shaqeyno yaraynta farqiga miisaaniyadda, waxaan mudnaanta siinaa u adeega bulshadeena iyo macallimiinteeda marka la eego habka ardayga muhiimada siinaya isla markaana diiradda saaraya-sinnaanta. Tiro ka mid ah shaqaalaha xafiiska dhexe, oo leh heerar kasta oo urur, ayuu saameeyay isbedelkan ku yimiday shaqaaluhu maadaama aan hore ugu sii socono sanad dugsiyeedka 2018-19. Nasiib darro, tirada boosaska xafiiska dhexe ayaa hoos loo dhigay. Waxaan rabaa in aan si qaddarin leh ugu mahadceliyo shakhsiyaadka ay saameysay kaasi oo la xiriira adeegyadooda iyo hoggaankooda ay ka hayeen PPS.

Isbedelada lagu dhawaaqay maantu, iyada oo ay yihiin kuwo adag, waxay keeni doonaan urur fiican, laakiin waxay noo oggolaanayaan in aan sii wadno awooda hay'adeed ee lagama maarmaanka u ah qabashada shaqooyinka muhiimka ah iyo sii wadida awooddeena aan taageero ku siinayno Dugsiyada Dadweynaha Portland. Xoojintan tayada hoggaaminta xarunteena dhexe, oo ay weheliso isbeddelka qaab-dhismeedka shaqaalaheena dugsiyada, waxay noo oggolaaneysaa in aan mudnaan sare siino taageerada tooska ah ee dugsiyada.

Waxaan sidoo kale rabaa in aan qaato fursad aan ku xaqiijiyo ballankaadkayga shakhsi ee dhowr meelood oo muhiim ah. Tani waxaa ka mid ah horumarkeena soo socota ee shaqada sinnaanta xagga isirka, oo aanu ku tilmaami doono Equity 2.0, waxaana loogu talagalay in lagu dhiso aasaaska shaqo iyo xirfada waxbarasho ee la gaaray sannadihii la soo dhaafay. Waxaan rajeynayaa in aan la shaqeeyo hoggaanka gudaha iyo kooxaha wax daneeya ee bulshada si ay u horumariyaan isla markaana u dhisaan qorshaha shanta sano ee soo socota ee sinnaanta xagga isirka. Ka dib dhowr bilood oo wada hadalo daacad ah iyo kor u qaadida wacyiga oo lala yeeshay waalidiinta, macallimiinta maamulayaasha, iyo hoggaamiyeyaasha bulshada, way iska cadahay in aanu aqoonsano isla markaana hirgelino cutubka xiga ee istiraatiijiyadaha loogu talagalay kor u qaadida natiijooyinka loogu talagalay ardayda aan taariikh ahaan sida fiican adeega u helin.

Mudnaan muhiim ah oo kale waxay noqon doontaa kor u qaadida awooddeena si aanu ugu lug yeelano hawlaha joogtada ee wax lagu hagaajinayo nidaam dugsi ahaan. Waa muhiim in urur kasta oo waxbarasho oo wax qabadkoodu sareeyo uu dejiyo bartilmaameed dhanka waxqabadka ah, uu la socdo horumarka jira isla markaana qiimeeyo saameynta ay shaqooyinkoodu ku leedahay maalgelinta ku aadan hadafyadooda. Waxaanu bilaabi doonaa shaqo si hufan loo wadaago horumarkeena ku aadan gaarida bartilmaameedka waxqabadka dugsi iyo xafiiska dhexe iyada oo ujeedadu tahay in si fiican xooga loogu saaro taageerooyinkeena dhisidda awooda.

Waxaan rajeynayaa in aan idinkala hadlo wax badan oo ku saabsan jidka inaga horreeya, jidkaasi oo sharaf ay noo tahay in ay ku socdaalno. Faahfaahin dheeraad ah ayaa soo baxaya anaga oo sii wadna qorshahayaga loogu talagalay sanadka soo socda. Waxaan rajeynayaa in aan la shaqeeyo Guddiga Waxbarashada si loo bilaabo aragti iyo nidaamka qorshe istiraatiijiyadeed ee xilliga dayrta. Ilaa taasi dhacayso, dhammaan waad ku mahadsan tihiiin ballanqaadkiina iyo taageeradiina inaga oo ka shaqaynayna in aanu wax ka bedelno PPS.

Si Daacadnimo leh,
Guadalupe Guerrero
Kormeeraha guud